# Waa maxay Takoorku?

**Kheyraadka loogu talogalay ardayda K-12, qoysaska, iyo bulshooyinka Oregon.**

Sharciga Oregon wuxuu kaa ilaaliyaa in lagugu takooro dugsiyada dadweynaha ee Oregon K-12 iyo dugsiyada hoos yimaada dadweynaha, oo ay ku jiraan barnaamijyada waxbarashada, adeegyada iyo waxqabadyada dugsiga. Taas macnaheedu waa **lagulama dhaqmi karo si ka duwan dadka kale qofka aad tahay darteed** meelahan. Tan waxaa ka mid ah:

ORS 659.850



fasalka dhexdiisa | ciyaaraha fudud | Naadiyada dugsiga | safarada dugsiga | baska dhexdiisa

Takoorku waa "ficil kasta oo **si aan macquul ahayn u kala qaybiya**, **ha noqdo ku talogal ama yuusan noqon**, ama fal kasta oo ah **qaab cadaaladeed laakiin shaqo ahaan takoorid ah**, oo ku salaysan midkood **da, naafo, asal qaran, isir, midab, xaaladda guurka, diinta, jinsiga, nooca galmada, ama aqoonsiga jinsiga**."

ORS 659.850; OAR 581-021-0045

Ficil aan **si macquul ahayn u kala qaybiya** marka qof ama koox dad ah loola dhaqmo si ka duwan ama si xun sababtoo ah haybtooda.

**Ku talogal ama aan ahayn ku talagal** macneheedu waa in ujeedada qofka, dugsiga, ama siyaasaddu aanay waxba ka beddelayn; Haddii ay keento in si kala duwan loola dhaqmo iyadoo ku salaysan dabaqadda la ilaaliyo, waa takoorid.

**Qaab cadaalad ah laakiin shaqada uu ku jiro takoor** waa marka siyaasad, habraac, ama dhaqan u khuseeyo qof walba si cadaalad ah, laakiin ay keento cadaalad daro lagula dhaqmo koox dabaqad ah oo la ilaaliyo. Tusaale ahaan: Xeerka lebbiska ee ka mamnuucaya in madaxa la daboolo dhammaan ardayda ayaa weli takooraya ardayda isticmaasha maro diimeed.

Dabaqadaha la ilaaliyo waa kooxo dad ah oo leh ilaalin sharci oo ka dhan ah takoorka. **Oregon waxay leedahay toban dabaqadood oo la ilaaliyo:** da'da, midabka, naafanimada, aqoonsiga jinsiga, heerka guurka, asal qaran, midabka, diinta, jinsiga, iyo nooca galmada.

## Takoorka waxaa ka mid ah:

- siyaasadaha dugsiga, nidaamyada, ama dhaqamada si cad dadka ukala qaybiya iyadoo lagu salaynayo dabaqadda la ilaaliyo, ama "qaab cadaalad ku dhisan" laakiin keena takoorid;
- marka shaqaale kasta oo ka tirsan degmada uu qaado tallaabo takoor ah isagoo gudanaya shaqadiisa;
  AMA
- fal dhibaatayn ah, cagajuglayn ama eex, oo ay ku jiraan ardaydu, haddii falku ku salaysan yahay dabaqada la ilaaliyo.

# Tusaalooyinka Takoorka

Macallin ayaa si isdaba joog ah u taabta timaha ardayga Madowga ah ardayda kale hortiisa wuxuuna ka faalloodaa timaha ardayga. Ardaygu wuxuu walaac u muujinayay maamulaha, kaasoo u sheegaya inay sababtu tahay in ardayda Madowga timahoogu ay yihiin kuwo gaar ah oo xiiso leh. Xataa kadib marka ardaygu sheego in uu dareemayo raaxo la'aan oo ay ku adagtahay in uu diirada saaro fasalka dhexdiisa macalinka, dugsigu ma qaado tillaabooyin uu kaga joojinayo inay taasi dhacdo.

Tani waxay u badan tahay inay tahay takoor sababtoo ah macalinku wuxuu ka hadlayaa oo taabanayaa timaha ardayga iyada oo ku saleysan **jinsiyadda** oo ardaygu mar dambe ma sii joogi karo ama kuma dareemi karo raaxo imaanshaha fasalka. Ardaygu waxa uu la kulmay dhibaatayn jinsiyadeed iyo guuldarraysiga dugsigu inuu arko oo uu kaga jawaabo taageero waa takoorid.

Allie waa arday fasalka dhexe ah oo ku abtirsanaya Yuhuudi; Waxay u dabaaldegtaa ciidaha Yuhuuda ee muhiimka ah waxayna si joogto ah u tagtaa sunagogga. Iskuulka, koox arday ah ayaa u sheega inay leedahay 'san weyn' waxayna ku majaajiloodaan inay ' qani tahay'. Marka Allie ay u sheegto dhibta macalinka, macalinku wuxuu u sheegaa ikhtiyaarka kaliya ee ah inay u guurto fasal kale.

Tani waxay u badan tahay inay tahay takoorid sababtoo ah Allie waa la dhibay oo waxaa loogu cagajugleeyay aqoonsigeeda Yuhuudda, kaas oo ah nooc takoor oo **asalka qaranka** ku salaysan abtirsiin la wadaago. Dugsigu waxa uu sii kordhinayaa takoorka isaga oo aan aqoonsanayn, iyo isaga oo aan u dhaqmin si uu u joojiyo dhibaataynta ama aanu taageero u fidin Allie.

Dugsiga dhexe wuxuu leeyahay siyaasad u baahan warqadaha oggolaanshaha waalidka si ay ardaydu uga qaybqaataan naadiyada. Naadiyada intooda badan, la-taliyayaashu waxay ururiyaan warqadaha oggolaanshaha oo ay fayl-gareeyaan, laakiin maamule ku-xigeenka ayaa codsanaya in la-taliyaha naadiga Isbahaysiga Galmada iyo Jinsiga (GSA) uu soo rogo warqadaha oggolaanshaha si uu u hubiyo oo u oggolaado.

Tani waxay u badan tahay inay tahay takoorid sababtoo ah inkasta oo dhammaan naadiyadu ay tahay inay helaan warqadaha oggolaanshaha, GSA waxaa loo qoondeeyey heer sare oo oggolaansho ah. Tani waa ula dhaqmid qaab kala duwan oo ku salaysan nooca galmada iyo aqoonsiga jinsiga.

Antonio waa arday fasalka saddexaad ah oo qaba ADHD kaas oo la halgamaya diiradda saarista iyo dhammaystirka waxqabadyada. Jimce kasta macalinka Antonio wuxuu u qabtaa "Jimcaha Madadaalada" ardayda dhammaysay hawshooda toddobaadkaa; Antonio had iyo jeer waa laga saaraa oo waa inuu ku shaqeeyaa miiskiisa halka ardayda kale ay wax cunaan oo ay ciyaaraan ciyaaraha.

Tani waxay u badan tahay inay tahay takoorid sababtoo ah nidaamka abaalmarinta "Jimcaha Maddadaalada" ee macalinka si aan ula kac ahayn ayaa xaddidaya gelitaanka Antonio ee faa'iidada waxbarashada, maadaama uu ku dhibtoonayo inuu dhammaystiro hawlaha sababtoo ah **naafonimadiisa**.

## Su'aalo ma ka qabtaa takoorka?

La xidhiidh Iskuduwaha Xuquuqda Madaniga ah ee dugsiga/degmada, ama la xidhiidh Khabiirada Taageerada Xuquuqda Madaniga ee Waaxda Waxbarashada ee Oregon ODE.CivilRightsSupport@ode.oregon.gov ama 971-673-2777

OREGON DEPARTMENT OF EDUCATION
*Oregon achieves . . . together!*